

Dhirta ubaxa leh

Dhirta ubaxalayda ahi waa dhirta ubaxa leh. Dhirta qaar waxa ay leeyihiin ubax waaweyn qaarna waxa ay leeyihiin ubax yaryar.

Ubax weyn iyo ubax yar

Ubaxa ugu weyn aduunka waxa la yiraa *Rafflesia arnoldii*. waxa uu dhextaalkiisu noqon karaa ilaa kabadan hal mitir. Waxa uu ka baxaa dalka Induuniisiya. Ubaxyada ugu yaryar dhexroorkoodu waa miliimitiro. Ma aragtay ubax aad u yar? Maxaa lagu yiraa magaciisa luqada noorwiiijiga am ta afkaaga hooyo?



Rafflesia arnoldii, Foto; Antoine Hubert, Flickr

Dhirta halka sano, labada sano ama sanadaha badan jirta

Dhirta sanadka noolaata

Dhir-ubaxeedyo badan oo kala duwan ayaa noolaan kara sanad, laba ama sanado badan. Dhirta atarka ama digirtu waxa ay noolaataa hal sanno keli ah. Manka ayaa soo biqla guga. Waxa ay ubaxa bixiyaan xagaaga oo dhalaan miro. Marka ay miruhu bislaadaan waqtiga dayrta ayaa geeduhu dhintaan.

Blomsterplanter – somali

Guga xiga ayey miruhu biqlaan oo ay noqdaan geedo cusub. waxa loogu yeeraa geedaha atarka iyo digirta dhirta sanadka noolaata.



Sukkererter



y

Dadku waxa a digir beeranayeen muddo laga joogo 8000 sano. Digirsonkoreedku waxa ay ka baxdaa woqooyiga Aasiya.

Dhirta laba sanno ah

Kaarootadu waxa ay noolaataa laba sanno waana dhirta labada sanno noolaata. Sanadka hore waxa biqla manka , waxaanu bixiyaa caleemo cagaar ah. Caleenta cagaarani waxa ay cunto u sameeyaan xididka. Xididku waxa uu ku waaqsadaa dhulka hoostiisa ilaa laga gaarayo xagaaga danbe.

Xagaaga danbe ubax ayuu bixiyaa waxana uu sameeyaa mann. Marka manku bislaado waa uu dhintaa geedku.

Marka ay hadana noqoto gu, ayaa manku biqlaa oo noqdaa geed cusub oo kaaroota ah. Karootadu waxa ay ka soo jeedaa bariga dhexe. Carabt ayaa Yurub keentay qiyaastii 1000 sanno ka hor.



Dhirta sanadah badan nool

Løvetann waxa uu ka soo jeedaa qaaradda yuryb iyo galbeedka Asiya. Laakiin waxa uu ku faafay dalal badanoo aduunka ah.



Waxa jira dhir badan oo kale oo nolaata sanado badan. Dhirta sanadaha badan noolaataa waxa ay leeyihiin xirfado kala duwan si ay u noolaan waqtiyada qaboobaha ama jiilaalka ah.



Geedka Tulipanka la yiraa waxa uu cuntada ku kaydsadaa inta kuusan ee u eg basasha. Intaa kuusan ee basasha ayaa badbaadda jiilaalkii. Marka gugu soo galo ayey bixisaa calemo iyo ubax.

Waxa loo malaynayaa in magaca tulipan ka yimid ereyga beershiga ah ee turban.

Blomsterplanter – somali

Dhirta caleemaha bixisaa waxa ay caleemaha daadisaa waqtiga deyrta, waxa ay u sameeyaan waayo caleemuhu waxa ay u baahanyihiin biyo, biyuhu baraf ayey noqdaan jiilaakii. Marka geeduhu aanay lahayn caleen uma baahna biyo badan. Sidaa ayey ku bad baadaan ilaa inta barafku ka dhalaalayo. Markaa ayey waxay sbixiyaan caleemo, ubax iyo mann.



Markblomster Ubax-duureed

Dhir-ubaxeedka ka baxda duurka, waxan layiraa ubax-duureed. Ubax duureedka waxa la arkaa guga horaantiisa. Ilaa deyrta waa la arkaa ubax-duureedka. Waxa jira noocyo badan oo kala duwan oo ubax-duureed ah. Noocyo badan oo ka mida waxa laga helaa jidka dhinacyadiisa. Xagga hoose waxad ku arki kartaa ubax-duureedyo ka baxa dalka Noorway.



Tistel



Rødknapp



Hestehov



Løvetann



Blåknapp



Blåveis



Blåklokke



Rødkløver



Tiriltunge



Prestekrage



Ryllik



Hvitveis